Hab

Adeegyada Caafimaadka ee Fairview

Siyaasad

Siyaasadda Qaan-sheegashada iyo Aruurinta Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka

Nuqullada la daabacay waxa loogu talagalay in la tixraaco oo kaliya. Fadlan tixraac nuqulka elektaroonigga ah ee nooca ugu dambeeyay.

Ujeeddo:

Siyaasaddaani waxay sharraxaysaa hannaanka dalbashada lacagta ee bukaanka iyo tallaabooyinka ururinta - ee Adeegyada Caafimaadka Fairview iyo HealthEast (oo si wadajir loogu yeedho, “Fairview”) - ee la qaadi karo haddii ay dhacdo in la bixin waayo lacagta daryeel caafimaad oo ay Fairview bixisay Fairview sida tallaabooyinka aan caadiga ahayn ee ururinta. Mabaadii'da hagta kana dambeysa siyaasadan ayaa ah in loola dhaqmo dhammaan bukaanada iyo dammaanad -qaadayaasha mas'uulka ah (oo halkan loogu yeedho "bukaan (bukaano") si isku mid ah oo sharaf iyo ixtiraam leh, in la xaqiijiyo in habraacyada dalbashada iyo ururinta lalcagta ee khuseeya iyo in la xaqiijiyo in dedaallo macquul ah la sameeyo si loo go'aamiyo in bukaanku u qalmo caawimaad hoos timaada Siyaasada Taageeradda Dhaqaale ee Fairview (oo halkan loogu yeedho “FAP”).

Qoraalka Siyaasadda:
Kadib marka ay bukaanadeenu helaan adeegyo, waa siyaasadda Fairview in ay lacagta uga dalbadaan bukaanada iyo lacag bixiyeyaasha ay quseyso si aan dib dhicin oo sax ah. Inta lagu gudajiro hannaankan dalbashada iyo ururinta lacagta, shaqaalaha Fairview waxa ka go'an inay bixiyaan adeeg macmiil oo tayo leh iyo dabagalka aan dib dhicin ee dhammaan lacagaha dadka lagu leeyahay. Shaqaalaha Fairview waxay sidoo kale u feejignaan doonaan arrimaha muujin kara in bukaanku u sharraxan yahay kaalmada dhaqaale ee hoos timaada FAP waana inay bukaanada ka caawiyaan hannaankaas.

Qeexitaanno.

Tallaabooyinka Aan Caadiga Ahayn ee Lacag Ururinta (ECA): Waxa ka mid ah hawlaha ururinta lacagta ee soo socda:

- Ka iibinta deynta bukaanka qolo kale badi xaaladaha.
- U-ssheegidda macluumaadka deynta ee sumcadda xun ee ku saabsan bukaanka wakaaladda deynta.
- Dib-u-dhigista ama diidmada daryeelka caafimaad ee hadda lagama-maarmaanka ah maadaama ay jirto lacag hore oo aan la bixin ama u baahashada in la bixiyo lacag aan hore loo bixin ka hor inta aan la bixin daryeelka hadda caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah.
- Tallaabooyinka u baahan hannaan sharci ama garsoor; oo ay ku jiraan qaadashada hantida, qaadashada mushaharka, qaadashada ama heynta lacagta bangiga, bilowga tallaabo madani ah, iyo tallaabooyinka kale ee sharciyeed ee la cayimay.

Baahida Caafimaad
Daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaanka ahi waa daryeelka uu qabo dhakhtarka/daaweeyaha ay aqoonsatay Fairview iyo sida waafaqsan heerka daryeelka loo baahan yahay:

- Si looga hortago bilowga ama ka sii darista jirro, xaalad, ama naafonimo;
- Si loo sameeyo falanqaynno;
- Si loo bixiyo daaweyn, daaweyn ama soo -kabasho loogu talagalay xaaladaha jireed, dabeecad iyo/ama xaaladaha caafimaadka maskaxda; iyo/ama
- Si looga caawiyo qofka inuu gaadho ama uu joogteeyo awoodda qabashada hawl-maalmeedka, iyadoo la tixgelinayo awooda shakhsiyeed ee qofka iyo awoodaha ku habboon dadka ay isku da'da yihiin, labadaba.
- Adeegyada lagama maarmaanka u ah caafimaadka waxa ka mid ah adeegyada bukaan-jiifka iyo bukaan-socodka sida lagu waajibiyey Title XIX ee Sharciga Amniga Bulshada ee Federaalka, iyo adeeg kasta oo uu

bukaan-jiifka ama bukaan-socodka siiyo cisbitaal isla markaana uu daboolo loona tixgeliyo inuu caafimaad ahaan lagama maarmaan yahay sida uu dhigayo Title XVIII ee Sharciga Amniga Bulshada ee Federaalka. Intaa waxa dheer, daryeelka uu ku bixiyo xarunta cisbitaalka iskaashade ama LLC uu isbitaalku ku leeyahay raasumaal ama dulsaarka macaashka ayaa u qalma gargaarka dhaqaale. Adeegyada waa in loo fuliyaa si waafaqsan jaangoynta qaranka ee dhaqanka caafimaadka ee guud ahaan la aqbalo waqtiga adeegyada la bixinayo. Adeeg kastaa waa inuu ahaadaa mid qaddar ahaan, muddo ahaan, iyo baaxad ahaanba ku filan si si macquul ah loogu gaadho ujeeddadiisa.

- Adeegyada lagama maarmaanka u ah caafimaadka ku ma jiraan adeegyada waxka qabadyada tijaabada ama ah isku qurxinta ah.
- Xaaladaha kale ee taageeraya baahida caafimaad ee daaweynta gaarka ah waxa ka mid ah:
  - Caddeyn cilmiyeed tayo sare leh oo muujinaysa in bukaanada qaba xaaladan gaarka ahi ay ka faa'iidaysan doonaan daaweynta la codsaday;
  - Nooca dheefta ahi ay tahay mid caafimaad ahaan muhiim ah; iyo/ama
  - Daawooyinka iyo dariiqyada siinta ee kale ee ka jaban la tixgeliyey lana diiday.

Wax Ka Qabadyada Tijaabada ah

Wax ka qabadyada tijaabada ah waa daaweyn iyo wax-kaqabadyo aysan guud ahaan u aqoonsanayn inay yihiin kuwo badbaado leh oo wax ku ool ah khubarada ku xeel dheer arrimaha quseeya baaritaanka, ka hortagga ama daaweynta xaaladda caafimaad ee laga hadlayo. Marka la go'aaminaayo wax ka qabadku uu yahay tijaabo, arrimaha khuseeya waxa ka mid ah balse ku ma koobna:

- haddii wax-kaqabadka kaliya laga heli karo isaga oo qeyb ka ah daraasad caafimaad;
- haddii maqaallada quseeya ee joornaalada ay dib u eegaan dhakhaatiirta kale ay ku baaqaan in daraasad dheeri ah lagu sameeyo wax-kaqabadka xaalada caafimaad ee laga hadlaayo; ama
- haddii wax ka qabadka loo adeegsan doono aag jirka kamid ah oo ka duwan, qaab aad uga duwan, iyo/ama xaalad caafimaad oo ka duwan, ta ay guud ahaan ay aqbalaan khubarada kale ee ka tirsan qeybta khuseysa [gudaha Fairview, Magaalooyinka Mataanaha ah, Minnesota, Mareykanka , iwm].

Culeys Aan Dhaqaale Ahaan La Qaadi Karin

Xaalad qarash aad u badan ku keenaysa hay'adda Fairview ee cashuur-dhaafka leh si ay u bixiso adeegga iyo dhacdooyinka baahida bukaanka ee adeegga ayaa ah in hay'addu aysan siin karin isla adeeggaas iyada oo aan la siin lacag ku filan dhammaan bukaanada la midka ah mas'uuliyad dhaqaale leh.

Qoys

Ujeeddada siyaasaddaan awgeed, qoysku waa:

- Lammaane is qaba iyo wixii ku tiirsanayaal ah, sida lagu qeexay tilmaamaha IRS.
- Shakhsi heysta ku tiirsanayaal sida lagu qeexay tilmaamaha IRS.
- Qof aan guursan oo aan lahayn ku tiirsanayaal.

Tilmaamaha saboolnimada ayaa si gooni ah loogu dabaqi doonaa qoys kasta oo ka tirsan reerka haddii reerku ka kooban yahay wax ka badan hal unug oo qoys.

Habraac:

1. Qaan-sheegashada Bukaanka:

Waa hadafka Fairview inay si sax ah oo aan dib dhicin uga codsato biilka dhammaan shirkadaha caymiska. In kastoo ay ku xidhan tahay xogta iyo xariirada ay ka hesho bukaanada iyo qarash bixiyaasha, Fairview waxay bixin doontaa adeegga la socoshada caafimaadka qofka oo ku filan si loo xaqiijiyo in bukaanadu helaan cadadka saxda ah iyo xogta qarashka lagu leeyahay isla markaana ay fursad u helaan bixinta qarashka iyo/ama u codsadaan daryeel bilaash ah. Hannaanka qaan-sheegashada waxaa taageeri doona tilmaamaha soo socda:

A. Dhammaan bukaanada caymiska heysta, Fairview waxay lacagta uga codsan doontaa bixiyeyaasha kale (sida uu bixiyay ama xaqiijiyay bukaanku) qaab aan dib dhicin, marka laga reebo waxyaabahaan soo socda:
   - Caymiska waddanka ka baxsan - Bukaanka waxa la siiyaa nuqulka codsiga lacagta si uu ugu gudbiyo caymiskiisa marka bukaanka codsado. Fairview waxay bukaanka ka filaysaa inay lacagta ku soo bixiyaan 90 maalmood gudahood. Fairview waxa laga yaabaa inay marka ay doonto iyadoo saleynaysa kiis-calaa-kiis ay lacagta ka codsato caymiska dalka ka baxsan iyadoo metelaysa bukaanka.

B. Sida waafaqsan Heshiisyada Heerarka Lacag-Aruurinta guud ee Qareenka ee hadda jira ee Fairview, dhammaan bukaanada aan lahayn caymiska ee haysta daganaanshaha Minnesota ama Wisconsin

kuwaasoo hela adeegyada caafimaad ahaan muhiimka ah ee isbitaalka ayaa heli doona qiimo-dhimista dadka aan caymiska lahayn. Qiimo-dhimista dadka aan caymiska lahayn waxay la mid noqon doontaa qiimo-dhimista ay helaan qarash bixiyaasheena shirkadaha caymiska ugu waawayn ee qandaraaska nagula jira ha ahaadeen kuwa dawlada ama kuwa gaarka loo leeyahay; baaqi kasta oo soo harana waxaa laga codsanayaa bukaanka inuu baxsho waqtiga ku habboon taasoo qayb ka ah habraaca caadiga ah ee qarash bixinta Fairview. Dhammaan bukaannadu waxay codsan karaan caddaynta qarashka koontadooda isbitaalka gashay markay doonaan.

C. Haddii sheegashada uu diido (ama uusan ka baaraandegin) bixiyahu sababtuna tahay khalad ay sameysay Fairview, Fairview ka ma soo codsan doonto bukaanka qaddar ka badan tan uu bukaanku mas'uul ka ahaa haddii bixiyahuuu bixin lahaa sheegashada.
D. Haddii sheegashada uu diido (ama uusan ka baaraandegin) bixiyahu sababtuna tahay arrimo aysan kaantaroolin Fairview, shaqaalaha Fairview ayaa dabaggal habboon ku sameyn doona bixiyaha iyo bukaanka si ay u fududeeyaan xallinta sheegashada. Haddii xallinta sheegashadu aysan dhicin kadib marka la sameeyo dedaallo dabaggal oo macquul ah, Fairview ayaa laga yaabaa inay lacagta ka codsato bukaanka ama ay qaado tallaabooyin kale ee waafaqsan jaangoynta dhaqanada wanaagsan ee Fairview.
E. Dhammaan bukaanada laga codsado lacagtu waxay fursad u heli doonaan inay kala soo xiriiraan Fairview wixii ku saabsan taageerada dhaqaale ama waxay kala hadli karaan qabanqaabada koontadooda wakhti kasta oo ka mid ah hannaanka codsashada lacagta.

II. Ururinta Bukaanka iyo Ururinta Wakaalada:

A. Ugu yaraan 3 bayaan oo kala duwan oo loogu talagalay ururinta koontooyinka iskood isu bixiya waa in lagu diraa boostada ama iimeylka cinwaankii ugu dambeeyay ee bukaanku bixiyay, si kastaba ha noqotee, looma baahna in la diro bayaano dheeri ah ka dib marka uu bukaanku soo gudbiyo codsiga dhammeyskatiran ee taageerada dhaqaale ee hoos timaadda FAP ama uu si buuxda u bixiyo lacagta. Ugu yaraan 60 maalmood waa inay ka soo wareeggaan tii ugu horreysay iyo tan ugu dambaysay ee 3da boosto ee loo baahan yahay. Waa waajibka bukaanka inuu bixiyo cinwaan boosto oo sax ah waqtiga adeegga ama marka uu guuro. Haddii koontadu aysan lahayn cinwaan sax ah, shaqaalaha ayaa go'aamin doona haddii la heli karo habab kale oo lagu heli karo bukaanka. Dhammaan bayaanada koontooyinka kalida ee bukaanka ee koontooyinka qofku lacagta bixinayo waxay ku jiri doona balse kuma koobna:
    1. Nuxurka saxda ah ee adeegyada uu daboolay bayaanku-bayaankii hore oo kaliya
    2. Ogeysiis qoraal ah oo ogeysiinaya isla markaana wargelinaya bukaanka helitaanka taageerada dhaqaale ee hoos timaada FAP-ta cisbitaalka, oo uu ku jiro lambarka taleefanka ee waaxda iyo cinwaanka bogga internetka ee laga heli karo nuqullada dukumiintiyada.
B. Haddii bukaanku dood ka keeno koontadiisa oo/ama codsado dukumentiiyo ku saabsan lacagta, Fairview waxay ku bixin doontaa dukumentiiyada la codsaday qoraal ahaan 7 maalmood gudahood. Haddii aysan suurtogal ahayn in jawaab lagu bixiyo 7 maalmood, warqad aqoonsi ah ayaa lagu soo diri doonaa 7 maalmood gudahood koontaduna waxay xidhnaan doontaa 30 maalmood ka hor intaan la sii wadin ururinta dhaafsiisan taariikhda jawaabta loo diray si waafaqsan Siyaasada Ashkatada iyo Cabashadaee Fairview. Jaangoynta jawaabta ee kor ku xusan waxay sidoo kale khuseyn doonaan hay'adaha ururinta iyo qareennada ururinta ee Fairview.
C. Tabashsooyinka daryeelka bukaanka waxa lagu maareyn doonaa hannaanka xallinta cabashada bukaanka iyo jawaabta bukaanka. Koont(ada/ooyinka) waxa loo xiri doonaa si habboon.
D. Iyada oo la adeegsanayo bayaannada codsiga lacagta, waraaqaha iyo wicitaanada taleefanka, Fairview waxay qaadi doontaa tallaabooyin dabaggal taxaddar leh si ay u dabagasho bukaanada una xalliso lacagaha lagu leeyahay, oo ay ku jirto u feejignaanta u-qalmitaanka bukaanka ee daryeelka samafalka ah. Haddii lacagaha aan la bixin inta lagu gudo jiro hannaankan, lacagaha lagugu leyahay waxa loo gudbin karaa hay'ad ama qareen kale si ay u soo ururiyaan.

III. Ururinta Sharciga ah iyo Tallaabooyinka Aan Caadiga Ahayn ee Lacag Ururinta:

A. Iyada oo la raacayo u hoggaansanaanta qodobbada siyaasaddan, Fairview waxay xisaabaadka ku kaydin kartaa ururinta sharciga waxayna qaadi kartaa wax kasta iyo dhammaan tallaabooyinka sharciga ah, oo ay ku jiraan ECAs, si ay lacag ugu helaan adeegyada caafimaadka ee la bixiyo.
B. Tallaabooyinka Aan Caadiga Ahayn ee Lacag Ururinta waxa loo bilaabi karaa sidan soo socota:
    1. Ugu yaraan 120 maalmood ayaa laga bixin doonaa lacagta ugu horeysa ee adeega bukaanka kadib ka hor intaan ECA-yada la qaadin iyo Fairview ayaa sidoo kale bixin doonta ugu yaraan 240 maalmood laga bilaabo taariikhda bayaankaas si uu bukaanku u codsado daryeelka samafalka ah ee hoos yimaada FAP.

2. Haddii bukaanku codsaday daryeelka samafalka ah ee hoos yimaada FAP ka hor bilowga ururinta sharciga, Fairview waa inay go'aamisaa u qalmitaanka bukaanka ka hor intaan ECA la bilaabin. Haddii uu bukaanku hore u heysto go'aan daryeel oo samafal ah lixdii bilood ee la soo dhaafay, go'aankan hore ayaa la isticmaali doonaa haddii aanay duruufaha bukaanku aad isu beddelin oo aanay daruuri ka dhigin in la sameeyo tixgelin cusub.
3. Ka hor intaan koontada loo gudbin ururinta sharciga ah, Fairview waxay sameyn doontaa baaritaanka tilmaamaha daryeelka samafalka ah si loo go'aamiyo haddii wax koontooyin ah laga reebayo ururinta sharciga ah. Koontooyinka loo gudbiyay ururinta sharciga ah, Fairview waa inay marka hore ogeysiis qoraal ah siisaa bukaanka loogu talagalay ECA-yada. Ogeysiiskaan waxa ku jiri doona nuxur ku qoran luqad fudud oo ku saabsan FAP waana in la bixiyaa ugu yaraan 30 maalmood ka hor intaan la bilaabin ECA. Inta lagu guda jiro wakhtigan 30ka maalmood ah, Fairview waxay sidoo kale sameyn doontaa dedaal macquul ah si ay afka uga wargeliso bukaan kasta oo loogu talagalay ECA-yada iyo inay ku wargeliso bukaanka Siyaasadda Gargaarka Dhaqaale ee Fairview. Tusaalaha dedaallada macquulka ah ee ogeysiiskaan afka ah waxa ka mid ah in la waco bukaanka iyo in loo reebo fariin cod ah.
4. Ka dib ku darista ururinta sharciga ah, qareennada lacag ururinta waxa loo oggolaan doonaa inay qabtaan ECA -yada sida xareynta tallaabooyinka garsoorka, fulinta qaadashada mushaharka iyo koontada bangiga, iyo adeegsiga qaababka kale ee sharciga ah ee ururinta; si kastaba ha noqotee, oggolaanshaha hore ee Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka ayaa loo baahan doonaa ka hor inta aan la bilaabin dacwadaha hore. Hawlaha noocaas ahi waxay hoos imaan doonaan shuruudaha Heshiisyada Jaangoynta Ururinta Qareenka Guud ee Fairview sida ku qeexan heshiisyada u dhexeeya dhinacyada.
5. Haddii uu bukaanku si daacadnimo leh u soo gudbiyo arjiga daryeelka samafalka ah inta ay ECA-yadu socdaan, Fairview waxay sameyn doontaa dedaalada ugu fiican si ay u joojiso ECA-yada inta codsiga laga shaqeynayo, go'aanka kama dambeys ahna la gaadhayo.

IV. Adeegga Macmiilka:

Inta lagu guda jiro hanaankan dalbashada iyo ururinta lacagta, Fairview iyo wakiiladeedu waxay bixin doonaan adeeg macmiil oo tayo leh iyagoo hirgelinaya hagayaashaan:

- Fairview iyo wakiiladeeda ayaa meel marin doona siyaasad aan u dulqaadan aflagaaddada, dhibaateynta, cayda, luuqada khiyaanada leh ama marin-habaabinta ah ee ay sameeyaan shaqaalaheedu.
- Fairview iyo wakiiladeedu waxay yeelan doonaan hannaan hufan oo loogu talagalay su'aalaha iyo/ama khilaafyada bukaanka kuwaas soo ay ku jiraan lambar taleefan oo bilaash ah oo ay bukaanku soo wici karaan iyo cinwaan xafiis shaqeed ay waraaqaha u soo qori karaan. Macluumaadkani wuxuu ku qornaan doonaa dhammaan bayaanada codsiga iyo ururinta lacagaha ee ay dirto Fairview.
- Kadib marka uu bukaanku la soo xiriiro Fairview, Fairview iyo shaqaalaheeda wakiilka ahi waxay dib ugu wici doonaan bukaanka sida ugu dhakhsaha badan (laakiin kama badnaan doonto hal maalin shaqo kadib markii uu bukaanku soo wacay) waxayna kaga jawaabi doonaan khilaafaadka qoraalka ah 7 maalmood gudahood sida uu dhigayo nidaamka cabashadu.
- Fairview iyo wakiiladeedu waxay yeelan doonaan diiwaanka ashkatooyinka iyo cabashooyinka bukaanka (hadal ama qoraal).

V. Diyaarsanaanta Siyaasadda:

- Nuqullada elektaroniga ah ee Siyaasadda Dalbashada iyo Ururinta Lacagta ee Fairview, Xeerka Caawimaada Dhaqaalaha ee Fairview iyo foomka Codsiga Daryeelkeena Bilaashka ah waxaad ka heli kartaa boggeena internetka oo ah: www.fairview.org/billing.
- Waxaad la xiriiri kartaa mid kamida Xafiisyadeena Dhexe ee Shaqada si aad u codsato nuqullada siyaasaddaan laguuguna soo diro boostada ama si aad ugala hadasho arjiga Charity Care iyo hanaanka u qalmida.
    - Adeegyada Caafimaadka Fairview waxa lagala xiriiri karaa 612-672-6724 ama khadka bilaashka ah ee 1-888-702-4073
    - Habka Daryeelka HealthEast waxaa lagaa la xiriiri karaa 651-232-1100 ama khadka bilaashka ah ee 1-866-770-6411
    - Xarunta Caafimaadka Fairview Range waxa lagala xiriiri karaa 218-362-6624 ama khadka bilaashka ah ee 1-877-390-6624
- Nuqullada warqadda ah ee siyaasadaheenna iyo foomka arjiga Charity Care waxa laga heli karaa mid kamida xafiisyadeenna biilasha iyo sidoo kale qeyb kasta oo kamid ah isbitaalka.
    - 750 E 34th Street, Hibbing, MN 55746
    - 1601 Golf Course Road, Grand Rapids, MN 55744

Qaadashada Hay'adaha waxa ka mid ah balse ku ma xaddidna:

Xaeunta Caafimaadka Fairview Lakes ayaa qaadatay siyaasaddaan.
Kooxda Caafimaadka Fairview ayaa qaatay siyaasaddaan.
Xarunta Caafimaadka Fairview Northland ayaa qaadatay siyaasaddaan.
Xarunta Caafimaadka Fairview Range ayaa qaadatay siyaasaddaan.
Fairview Ridges Hospital ayaa qaatay siyaasadan.
Fairview Southdale Hospital ayaa qaadatay siyaasaddaan.
Xarunta Caafimaadka Jaamacadda Minnesota Minnesota ayaa qaadatay siyaasaddaan.
Grand Itasca Clinic & Hospital ayaa qaatay siyaasaddaan
HealthEast Bethesda Hospital ayaa qaatay siyaasaddaan
HealthEast St. John’s Hospital ayaa qaatay siyaasadan.
HealthEast St. John’s Hospital ayaa qaatay siyaasadan.
HealthEast Woodwinds Hospital ayaa qaatay siyaasadan.
HealthEast Clinics iyo hay'adaha kale ee Cashuurta laga dhaafay ayaa qaatay siyaasaddaan.

Mulkiilaha Siyaasadda:

Agaasimaha Habka, Wareegga Dakhliga

Waxa Ansixiyay:

Guddiga Agaasimayaasha ee Fairview

Taariikh(da/aha)

Taariikhda Dhaqangalka: 4/1/05Taariikhda Wax Laga Beddelay: 4/03/12, 6/27/13, 3/5/14, 3/1/15, 2/1/16, 7/24/17, 6/20/19, 2/10/20, 2/1/21**Taariikhda Dib-loo-eegay:** Guddiga Fairview ayaa Dibu-eegay oo Dib u Ansixiyay: 5/7/15, 6/17/16, 8/17/17, 11/5/19, 8/5/21**Taarikhda Dib-u-eegista La Hirgaliyay:** 4/24/14, 5/7/15, 6/17/16, 11/1/17